Faallo Kooban 20

Febraayo 2023

Soo koobid

Tan iyo markii la doortay madaxweynaha Soomaaliya Xasan Sheekh Maxamuud bartamihii bishii May ee sanadkii 2022, waxaa magaalada Muqdisho afar jeer ku kulmay Golaha Wadatashiga Qaran (GWQ) oo ay xubno ka yihiin madaxda ugu sarreysa dowladda federaalka, Dowlad-goboleedyada iyo gobolka Banaadir. Golaha Wadatashiga Qaran waa madal ay ku kulmaan hoggaamiyeyaasha fulinta ee dowladda federaalka iyo Dowlad-goboleedyada kuwaasoo madasha uga wada xaajooda ugana heshiiya arrimaha siyaasadeed ee la isku hayo. Shantii sano ee lasoo dhaafay, shirarka Golaha Wadatashiga Qaran waxay u muuqdeen kuwo mar mar dhaca. Arrinta kaliya ee xubnaha madasha ay go'aan ka gaareen waxay ahayd doorashadii dadbaneyd. Labadii shir ee ugu horreeyay ee bilihii Juun iyo Sebteembar ee sanadkii hore, xubnaha GWQ kama aysan doodin arrimo la taaban karo. Sikastaba ha ahaatee, shirkoodii saddexaad ee dabayaaqadii bishii Oktoobar dhacay, GWQ waxa uu isku raacay hirgelinta Naqshadda Amniga Qaranka – oo lagu heshiiyay bishii Abriil 2017 – waxayna dhiseen guddi farsamo oo loo xilsaaray in uu dib-u-eegis ku sameeyo heshiiska. Dabayaaqadii Diseembar 2022, GWQ ayaa ka heshiiyay nooca garsoorka Soomaaliya iyo nidaamka awood qeybsiga waxayna madashu sii qorsheysay in dabayaaqada Febraayo 2023 wadatashiyo iyo heshiis siyaasadeed laga gaari doono arrimo ay kamid yihiin doorashooyinka iyo federaalaynta maaliyadda. Sikastaba ha ahaatee, Puntland ayaa ka baxday GWQ kadib heshiisyadii awood qeybsiga iyo nooca garsoorka. Hoggaanka dowladda federaalka ayaa madashan siyaasadeed u arka madal labadii biloodba mar looga hadlo loogana heshiiyo arrimaha ugu muhiimsan ee siyaasadda Soomaaliya la isku hayo kuwaasoo cuuriyeemiyey dib-u-eegista iyo dhameystirka dastuurka federaalka. Faalladan kooban waxa ay falanqeyneysaa heshiisyada Golaha Wadatashiga Qaran ee nooca garsoorka iyo awood qeybsiga. Waxay iftiimineysaa caqabadaha, waxayna soo bandhigeysaa dhowr talo oo tixgelin mudan.Heshiisyada awood qeybsiga iyo garsoorka oo ay gaareen Golaha Wadatashiga Qaran: sida looga gudbi karo ismari-waaga siyaasadeed

Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

www.somalipublicagenda.org

© 2023 Somali Public Agenda

Hordhac

Tan iyo markii Xasan Sheekh Maxamuud loo doortay Madaxweynaha Soomaaliya 15-kii May 2022, sidoo kalena la dhisay Golaha Wasiirada cusub ee dowladda federaalka 2-dii Ogosto 2022, xubnaha Golaha Wadatashiga Qaran ayaa kulmay afar jeer kahor dhamaadka sanadkii 2022. Golaha Wadatashiga Qaran waa madal ay xubno ka yihiin madaxda fulinta ee Dowladda Faderaalka ee Soomaaliya, Dowlad-goboleedyada, iyo Maamulka Gobolka Banaadir. 9-ka xubnood ee ay madashu ka kooban tahay waa madaxweynaha, ra'iisul wasaaraha, iyo ra'iisul wasaare ku xigeenka dowladda federaalka, madaxweynayaasha Puntland, Jubaland, Koonfur-galbeed, Galmudug, Hirshabeelle iyo guddoomiyaha gobolka Banaadir. Xubinimada raysal wasaare ku xigeenka ayaa ah mid ku cusub GWQ balse waxa loo arkaa qaab Soomaaliland loogu metelayo GWQ.

Labadii kulan ee GWQ ugu horeeyay ee dhacay 11-12 Juun iyo 11-12 Sebteembar, xubnaha GWQ kama aysan hadlin arrimo la taaban karo. Kulankoodii saddexaad ee dhacay 27-31 Oktoobar 2022, GWQ waxa uu ku heshiiyay hirgelinta Naqshadda Amniga Qaranka ee Abriil 2017. Tani waxay la yaab ku noqotay falanqeeyayaasha, maadaama Naqshadda Amniga Qaranka aan la fulin 5-tii sano ee lasoo dhaafay una baahnaa dib-u-eegis. Sikastaba ha ahaatee, GWQ waxay ku heshiiyeen dhisida guddi farsamo shirarkoodii saddexaad iyo afaraad ee dhacay Oktoobar iyo dabayaaqadii Diseembar 2022 guddigaasoo ka shaqeyn doona dib-u-eegista iyo dhameystirka Naqshadda Amniga Qaranka ee lagu heshiiyey Abriil 2017. Guddiga waxaa loo xilsaaray in uu soo saaro warbixin iyo talooyin uu GWQ ku falanqeeyo kulankooda u muddeysan 20-24 Febraayo 2023. Sida uu Madaxweyne Xasan Sheekh ku sheegay khudbadii uu shacabka u jeediyay maalintii ugu dambeysay ee sanadkii 2022, guddiga farsamada ayaa dejin doona qorshaha hirgelinta Naqshada Amniga Qaran ee 2017. Sameynta guddigan farsamo ayaa horay loogu heshiiyey shirkii ugu dambeeyay ee GWQ oo ay xubnuhu ku oggolaadeen in la dhaqan geliyo Naqshadda Amniga Qaranka ee lagu heshiiyey bishii April 2017.

Intaa waxaa dheer, warmurtiyeedkii shirkii saddexaad ee GWQ (27-31 Oktoobar 2022) wuxuu lahaa lifaaq ku saabsan arrimaha looga hadlayo labada shir ee GWQ ee soo aadan kuwaasoo la qorsheeyay dhammaadka Diseembar 2022 iyo dabayaaqada Febraayo 2023. GWQ waxa uu qorsheeyay in uu ka doodo kana heshiiyo nooca garsoorka iyo awood qeybsiga dabayaaqada Diseembar 2022, taasoo ay sameeyeen. Waxa kale oo uu qorsheeyay dabayaaqada bisha Febraayo wadahadal iyo heshiis in ay madashu ka gaarto federaaleynta maaliyadda, maqaamka Muqdisho, iyo doorashooyinka. Dad badan ayaa u arka in 5 arrimood oo kamid ah kuwa la isku hayo looga heshiiyo labo shir oo GWQ ay tahay hami weyn.

Shirkii afaraad ee GWQ wuxuu Muqdisho ka dhacay intii u dhexeysay 25-kii iyo 28-kii Diseembar 2022 waxaana looga hadlay arrimo horay loogu heshiiyey ka hadalkooda – nooca garsoorka iyo awood qeybsiga. Marka laga reebo Madaxweynaha Puntland, xubnaha kale ee GWQ ayaa markii ugu horeysay ku heshiiyay oo saxiixay nidaamka awood qeybsiga iyo nooca garsoorka. Warqado ka kooban 8-9 bog oo qeexaya qodobada lagu heshiiyey ayaa la saxiixay. Labada qeybood ee soo socota ayaa lagu falanqeynayaa labada heshiis iyo saameynta ay yeelan karaan. Labadan arrimood ayaa kamid ah dhowr arrin oo la isku hayo oo curyaamiyay dhameystirka nidaamka federaalka iyo dib-u-eegista dastuurka kumeelgaarka ah.

Heshiiska Qoondeynta Awoodaha

Sida ku xusan heshiis ka kooban 9 bog oo faahfaahinaya habka awood qeybsiga, awoodaha waxa loo qeybin doonaa kuwo dowladda federaalka u gaar ah, kuwo dowlad-goboleedyada u gaar ah, kuwo la wadaago, iyo awoodo u gaar ah dowladaha hoose. Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay yeelan doontaa 44 awoodood oo gaar u ah (waxa ay Dastuurka Federaalka Kumeelgaarka ah ee hadda ku leedahay 4 awoodood oo gaar ah); Dowlad-goboleedyadu waxay yeelan doonaan 29 awoodood oo u gaar ah; 20 awoodood waxaa wadaagi doona Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada; halka 32 awoodood ay gaar u noqon doonaan dowladaha hoose. Heshiiska waxa uu sidoo kale qorayaa awoodaha gaarka ah ee ay yeelanayaan hay'adaha sharci dejinta ee dowladda federaalka, dowlad-goboleedyada, iyo dowladaha hoose

Sida lagusoo koobay jadwalka hoose, 125-ta awoodood waxaa loo qeybiyey 6 qeybood:

	Awoodaha gaarka u ah Dowladda Federaalka	Awoodaha gaarka u ah Dowlad-goboleedyada	Awoodaha ay wadaagayaan Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada	Awoodaha ay gaarka u leeyihiin Dowladaha Hoose
Awoodaha Guud	18 Awoodood oo u Gaar ah Dowladda Federaalka	7 Awoodood oo u Gaar ah Dowlad-goboleedyada	8 Awoodood oo la Wadaagayo	2 Awoodood oo u gaar ah Dowladaha Hoose
Awoodaha Dhaqaalaha	8 Awoodood oo u Gaar ah Dowladda Federaalka	6 Awoodood oo u Gaar ah Dowlad-goboleedyada	6 Awoodood oo la Wadaagayo	9 Awoodood oo u gaar ah Dowladaha Hoose
Kaabayaasha Dhaqaalaha	5 Awoodood oo u Gaar ah Dowladda Federaalka	5 Awoodood oo u Gaar ah Dowlad-goboleedyada	Ma jiraan	2 Awoodood oo u gaar ah Dowladaha Hoose
Amniga iyo Cadaaladda	6 Awoodood oo u Gaar ah Dowladda Federaalka	3 Awoodood oo u Gaar ah Dowlad-goboleedyada	2 Awoodood oo la Wadaago	2 Awoodood oo u Gaar ah Dowladaha Hoose
Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada	5 Awoodood oo u Gaar ah Dowladda Federaalka	5 Awoodood oo u Gaar ah Dowlad-goboleedyada	4 Awoodood oo la Wadaago	14 Awoodood oo u Gaar ah Dowladaha Hoose
Waxbarashada	2 Awoodood oo u Gaar ah Dowladda Federaalka	3 Awoodood oo u Gaar ah Dowlad-goboleedyada	Ma jiraan	3 Awoodood oo u Gaar ah Dowladaha Hoose
Wadarta Guud	44 Awoodood oo u Gaar ah Dowladda Federaalka	29 Awoodood oo u Gaar ah Dowlad-goboleedyada	20 awoodood oo ay wadaagayaan DFS-Dowlad-goboleedyada	32 Awoodood oo u Gaar ah Dowladaha Hoose

Dhowr faa'iido ayuu leeyahay nidaamka awood qeybsi ee lagu heshiiyey. Ugu horreyn, nidaamka awood qeybsiga ayaa inta badan lagasoo qaatay hannaankii awood qeybsi ee ay soo jeediyeen hay'adaha dib-u-eegista dastuurka sanadkii 2021. Sidaas darteed, heshiisku waxa uu leeyahay aasaas sharciyeed iyo mid siyaasadeed maadaama ay soo diyaariyeen guddiyada dastuurka oo sameeyay wadatashiyo. Soo jeedintii 2021 waxay ahayd 44 awoodood oo gaar u ah dowladda federaalka, 29 awoodood oo gaar u ah dowlad-goboleedyada, iyo 12 awoodood oo la wadaagayo. Labada arrin ee ka duwan waxay kala yihiin in awoodaha wadaagga la kordhiyey sidoo kalena awoodo gaarka ah loo qoondeeyey dowladaha hoose.

Midda labaad, heshiiska cusub waxa uu dowladaha hoose u qoondaynayaa 32 awoodood oo gaar u ah. Waa markii ugu horeysay oo awood loo qoondeeyo dowladaha hoose inkastoo guddoomiyaha gobolka Banaadir ahna duqa magaalada Muqdisho uu yahay xubinta keliya ee GWQ ku matasha dowlad hoose. Hay'adaha dib-u-eegista dastuurka ayaa soo jeedintoodii 2016 iyo 2021-kii ku guul-darreystay inay awoodo gaar ah u qoondeeyaan dowladaha hoose. U qoondeynta awoodo u gaar ah dowladaha hoose waa horumar wanaagsan oo sare u qaadi karta daadejinta adeegyada bulshada. Tani waxay sidoo kale horumar muhiim ah u tahay ka doodista federaaleynta maaliyadda ee Soomaaliya iyadoo sidoo kale dowladaha hoose ay door muhiim ah ka qaadan doonaan hirgelinta hannaan kasta oo federaaleyn maaliyadeed ah oo lagu heshiiyo.

Midda saddexaad, nidaamka lagu heshiiyey ee awood qeybsiga ayaa awoodaha qaran ee muhiimka ah siinayaa dowladda federaalka. Dhanka kale, Dowlad-goboleedyadu waxay yeelan doonaan 29 awoodood oo gaar u ah waxa ayna 20 awoodood la wadaagi doonaan dowladda federaalka. Tani waxay wadar ahaan noqonaysaa 49 awood fulineed, waxaana loo arki karaa nidaam awood qeybsi oo miisaaman. Nidaamka lagu heshiiyey waxa uu abuurayaa masuuliyado badan oo ay iska kaashanayaan dowladda federaalka iyo Dowlad-goboleedyada. Awoodaha fulinta ee la wadaagayo waxaa kamid ah kheyraadka dabiiciga ah, kalluumeysiga, kheyraadka badda, ganacsiga, beeraha, iyo tayo-dhowrka.

Dhanka kale, waxaa jira saddex cilladood ee uu leeyahay nidaamka lagu heshiiyey ee awood qeybsi. Ugu horreyn, qodobka 12-aad ee awoodaha guud – oo sheegaya in uu jiri doono hal guddi doorasho oo heer qaran ah oo maamuli doona doorashooyinka heer federaal, heer dowlad-goboleed iyo heer dowladaha hoose – ayaa loo fahamsan yahay in si gaar ah loogu qoondeeyay dowladda federaalka. Marka la eego dukumeentiga lagu heshiiyey, awooddani waxay ku jirtaa liiska awoodaha gaarka u ah dowladda federaalka iyo kuwa gaarka u ah dowlad-goboleedyada labaduba. Sikastaba ha ahaatee, waa markii ugu horreysay oo nidaam doorasho mideysan ay ku heshiiyaan madaxda fulinta, waxayna tani saameyn weyn ku yeelan doontaa qabsoomidda doorashooyinka Soomaaliya. Dhaqanka hadda jira aad ayuu uga duwan yahay hannaanka lagu heshiiyay maadaama dhowr Dowlad-goboleed ay horey u lahaayeen guddiyo doorasho oo maareeya doorashooyinka Dowlad-goboleedka.

Galmudug ayaa dhawaan dhistay Guddi Madax-banaan ee Doorashooyinka heer dowlad goboleed oo ka kooban 7 xubnood oo ay hogaamineyso Xaliimo Ismaaciil Ibraahim (Xaliima Yarey) oo ah ku simaha guddoomiyaha Guddiga Madaxa-banaan ee Doorashooyinka Qaranka oo la kala diray. Puntland ayaa waxaa ka socda tartan siyaasadeed oo xisbiyo ku dhisan, waxaana maamulaya Guddiga Kumeelgaarka ah ee Doorashooyinka Puntland. Guddigan waxa uu doorashooyin tijaabo ah ka fuliyay saddex degmo oo kala ah Qardho, Eyl, iyo Ufeyn dabayaaqadii sanadkii 2021. In hal guddi doorasho qaran la sameeyo waxay la macno tahay in la kala dirayo guddiyadaan, taasoo wax weyn ka beddeleyso saameynta siyaasadeed ee hoggaanka Dowlad-goboleedyadu ku leeyihiin guddiyadaan. Sikastaba ha ahaatee, hannaankan doorasho waxaa loo arki karaa mid macquul ah haddii GWQ uu ku heshiiyo nidaam doorashooyin mideysan oo heer dowlad-goboleed ah.

Inkastoo mabda' ahaan lagu heshiiyey hal guddi doorasho, haddana waxaa qorshuhu yahay in doorashada heer federaal iyo heer dowlad-goboleed si gaar ah looga tashado si gaar ahna looga heshiiyo. Dabayaaqada Febraayo 2023, Golaha Wadatashiga Qaran ayaa qorsheynaya in uu ka doodo doorashooyinka (heer federaal iyo heer dowlad goboleed). Waxaa la sameeyay guddi farsamo si ay u diyaariyaan xulashooyinka doorashooyinka heer qaran iyo heer dowlad goboleed. Xubnaha GWQ ayaa ka doodi doona talooyinka guddiga farsamada kahor inta aanu go'aan ka gaarin.

Midda labaad, maadaama inta badan qoondeynta awoodaha lagasoo qaatay warbixintii sanadkii 2021 ay qoreen hay'adaha dib-u-eegista dastuurka, waxaad muuqata in aan laga gelin wada-hadal badan iyo falanqeyn awoodaha fulineed ee ku habboon heerarka dowladeed. Hay'adaha ay khusayso arinkan ma aysan helin fursad ay wax ugu biiriyaan madasha, tanina waxay saameyn taban ku yeelan kartaa hirgelinta heshiiska gaar ahaan maadaama nidaamka awood qeybsiga ee lagu heshiiyey loo qaadan karo mid awood fulineed oo dheeraad ah siinaya dowladda dhexe.

Arrin saddexaad ayaa ah in dowladda federaalka ay si gaar ah u maamuleyso dekedaha iyo garoomada. Inkastoo ay arrintan wanaagsan tahay, haddana waxay u muuqataa mid ka fog dhaqanka hadda ka jira Soomaaliya. Dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka ayaa hadda maamula dekedaha iyo garoomada diyaaradaha ee ku yaalla maamulladooda. Heshiisyo hore oo ku saabsanaa awoodaha gaarka ah ee ay dowladda federaalka u leedahay in ay maamusho dekedaha iyo garoomada diyaaradaha ee Soomaaliya ayaa horey loo galay, balse marnaba lama dhaqan gelin. Tusaale ahaan, heshiiskii ka dhacay Addis Ababa ee Jubaland 2013 waxa uu farayay in dowladda federaalka lagu wareejiyo maamulka garoonka iyo dekedda Kismaayo, taasoo aan hirgelin. Dhinaca kale, awooddani waxay si dhow ugu xeran tahay hannaanka federaaleynta maaliyadda. Uruurinta, maamulka iyo wadaagga dakhliga dekedaha iyo garoomada diyaaradaha ayaa la qorsheeyay in lagu caddeeyo heshiiska federaaleynta maaliyadda ee loo madlan yahay dabayaaqada Febraayo 2023.

Nidaaminta Garsoorka

Golaha Wadatashiga Qaran ayaa sidoo kale ku heshiiyay nooc garsoor mideysan, kaasoo beddelaya noocyadii hore. Nooca lagu heshiiyey wuxuu u nidaaminayaa garsoorka sida soo socota:

1. Waxaa jiri doona hal Gole Sare oo Garsoor. Golahan ayaa beddeli doona Golaha Adeegga Garsoorka ee qodobbada 109A iyo 111A ee dastuurka ku xusan, kaasoo uu kala diray madaxweyne Xasan Sheekh 9-kii Oktoobar 2022. Golaha Sare ee Garsoorka ayaa noqonaya hay'adda ugu sarreysa ee maamuleysa garsoorka dalka.
2. Waxaa jiri doona hal maxkamad dastuur. Dowlad-goboleedyada ma yeelan doonaan maxkamado dastuur oo iyaga u gaar ah, maxkamadahooda sarena ma garsoori karaan arrimo la xiriira dastuurka.
3. Waxaa jiri doona hal maxkamad sare oo heer federaal ah, taasoo garsoori doonta dacwooyinka rafcaanka lagasoo qaato maxkamadaha sare ee heer dowlad-goboleed.
4. Dowlad-goboleed kasta waxa uu yeelan doonaa Maxkamad Sare, Maxkamad Racfaan, iyo Maxkamadaha Darajada Koowaad (degmo kasta iyo gobol kasta).
5. Waxaa jiri doona xafiis heer federaal ah ee Xeer Ilaaliyaha Guud ee dalka halka Dowlad-goboleed kasta ay Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Heer Dowlad-goboleed yeelan doonaan.
6. Dhammaan maxkamadaha ku yaalla dowlad-goboleedyada waxay awood u yeelan doonaan garsoorka dacwadaha la xiriira dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada.

Jadwalka hoose waxa uu soo koobayaa nooca garsoorka ee lagu heshiyey:

	Heer Federaal	**Heer Dowlad-goboleed**	**Heer Gobol iyo Degmo**
Golaha Garsoorka	Golaha Sare ee Garsoorka	Ma laha	Ma laha
Maxkamada Dastuurka	Maxkamada Dastuurka ee Heer Qaran	Ma laha	Ma laha
Maxkamad Sarre	Maxkamada Sarre ee Federaalka	Maxkamadda Sarre	Ma laha
Maxkamadaha Racfaanka	Ma laha	Maxkamadaha Racfaanka	Ma laha
Maxkamadaha Darajada Koowaad	Ma laha	Ma laha	Maxkamadaha Darajada Koowaad
Xafiisyada Xeer Ilaaliyaha Guud	Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Federaalka	Xafiisyada Xeer Ilaaliyaha Guud ee Dowlad-goboleedyada	Ma laha

Nooca garsoorku waxa uu ka duwan yahay seddexdii nooc ee hore:

1. Noocii Jowhar oo ay saxiixeen Wasiirada Cadaaladda ee dowladda federaalka iyo Dowlad-goboleedyada 24-tii Janaayo 2018;
2. Noocii Golaha Wasiirada oo ay ansixiyeen golaha wasiirada 6-dii Agoosto 2018; iyo
3. Noocii isku-dhafka ah ee ay soo jeediyeen guddiyada dib-u-eegista dastuurka sanadkii 2021.

Noocii Jowhar	**Noocii Golaha Wasiirada**	**Noocii Isku-dhafka**
• Guddiyada Adeegga Garsoorka ee heer federaal iyo heer Dowlad-goboleed • Maxkamada sare ee dowladda federaalka • Maxkamada dastuurka ee Dowladda Federaalka • Maxkamadaha sare ee dowlad-goboleedyada oo awoodna u leh in ay garsooraan arrimaha la xiriira dastuurrada Dowlad-goboleedyada	• Hal Guddi Adeeg Garsoor • Hal Maxkamad Dastuur • Hal Maxkamad Sare ee Federaal • Maxkamadaha Racfaanka waa maxkamadaha ugu sarreeya ee Dowlad-goboleedyada	• Hal Gole Sare oo Garsoor balse Dowlad-goboleed kasta waxa uu ku yeelan doonaa xubno kumeelgaar ah oo ka tirsan Golaha Sare ee Garsoorka • Maxkamada Dastuurka ee Dowladda Federaalka • Maxkamadda Sare ee Qaranka • Maxkamadaha Saree e Heer Dowlad-goboleed oo noqon kara maxkamadaha darajada koowaad ee arrimaha dastuurka

Nooca garsoorka mideysan ee lagu heshiiyay ayaa leh faa'iidooyin dhowr ah. Midda koowaad, waxa uu Dowlad-goboleed kasta u oggolaanayaa in uu lahaado dhammaan saddexda heer ee maxkamadaha: maxkamadaha darajada koowaad, maxkamadda rafcaanka, iyo maxkamadda sare. Tani waxay faa'iido u tahay Dowlad-goboleedyada maadaama uu noocan la jaan-qaadayo qaab-dhismeedkooda maxkamadeed oo ay kamid yihiin maxkamadaha sare.

Midda labaad, noocan wuxuu abuurayaa hal Gole Sare oo Garsoor, kaasoo hagaya shaqada garsoorka noqonayana hay'adda ugu sarreysa ee garsoorka. Tan waxaa loo arki karaa mid macquul ah marka laga eego dhinaca dhaqaalaha iyo maamulka labadaba sababta oo ah waxay suuragelineysaa midnimada hoggaanka garsoorka. Wakiillo ka socda Dowlad-goboleedyada ayaa xubno ka noqonaya Golaha Sare ee Garsoorka, taasoo ka dhigaysa gole loo dhan yahay oo metelaya aragtida Dowlad-goboleedyada.

Midda saddexaad, dhammaan maxkamaduhu waxay awood u yaalanayaan inay go'aan ka gaaraan dacwadaha noocyadooda kala duwan. Tani waxay lagama-maarmaan ka dhigeysa in wada shaqeyn dhow iyo xiriir shaqo uu dhexmaro dhammaan heerarka maxkamadaha. Waxay ku habboon tahay qaab-dhismeedka maxkamadaha ee hadda jira sidoo kale waa mid dhaqaale ahaan macquul ah.

Iyadoo faa'iidooyinkaan ay jiraan, haddana nooca garsoor ee lagu heshiiyey waxa uu leeyahay cillado. Midda koowaad, baarlamaanka federaalka wax door ah kuma lahan magacaabista iyo ansixinta Golaha Sare ee Garsoorka. Inkastoo inta badan xubnaha golahan, oo noqon doona hay'adda ugu sarreysa garsoorka, ay ka imaanayaan xafiisyada iyo hay'adaha garsoorka, haddana waxaa jira xubno ka imaanaya ururka qareennada iyo bulshada rayidka, kuwaasoo uu soo magacaabi doono Wasiirka Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee Dowladda Federaalka waxaana ansixin doona Golaha Wasiirada. Sida ku cad heshiiska, xubnahani uma baahna ansixinta baarlamaanka.

Midda labaad, Puntland waxay dhowaan dhistay maxkamad dastuur waxayna leedahay maxkamad sare (Dowlad-goboleedyo kale ayaa sidoo kale leh maxkamado sare). Nooca garsoor ee lagu heshiiyey waxa uu keenayaa in la baabi'iyo hay'addan curdanka ah, taasoo qeyb ka noqon karta sababaha uu Madaxweynaha Puntland u saxiixi waayey heshiiska.

Midda saddexaad, qaar kamid ah Dowlad-goboleedyada ayaa door bidaya in maxkamadahooda sare ay awood u yeeshaan inay garsooraan arrimaha dastuurka ee Dowlad-goboleedyada. Marka loo eego muddada dhaw, tani waxay u adeegi kartaa danaha madaxweynayaasha xilka haya oo ay suuragal tahay inay beddelaan qodobada qaar ama kordhistaan muddo-xileedkooda. Sikastaba ha ahaatee, haddii doorashooyinka la mideeyo oo

dastuurrada Dowlad-goboleedyadana la waafajiyo dastuurka federaalka, waxaa macno sameynaya in maxkamadda dastuurka ee qaranku ay garsoorto dhammaan arrimaha dastuurka ee dhammaan heerarka dowladda. Soo jeedinta ah in maxkamadaha sare ee Dowlad-goboleedyada ay u adeegi karaan sida maxkamadaha darajada koowaad ee arrimaha dastuurka ayaa sidoo kale ah aragti macquul ah mustaqbalka oo la tixgelin karo marka maxkamadahaan la dhisayo.

Caqabadaha ugu waaweyn

Waa arrin bogaadin leh in inta badan xubnaha Golaha Wadatashiga Qaran ay isku raaceen nooca garsoorka iyo awood qeybsiga. Kulamada joogtada ah ee GWQ ayaa sidoo kale muujinaya ka go'naanta madaxda cusub ee dowladda federaalka ee ka tashiga iyo helidda is-afgarad ku saabsan arrimaha siyaasadda Soomaaliya ee la isku hayo, taasoo horseedi karta dhameystirka hannaanka federaaleynta iyo dastuurka federaalka kumeelgaarka ah. Sikastaba ha ahaatee, waxaa jira caqabado uu wajahayo GWQ, oo ay tahay in madaxda dowladda federaalka gaar ahaan ay la tacaalaan xalna u raadinayaan.

Ugu horeyn, iyadoo aan la sheegin qodobada ku jira heshiisyada oo uu madaxweynaha Puntland saluugsan yahay, waxay Puntland soo saartay qoraal ku aadan go'aankeeda. Nuxurka qoraalka ayaa ahaa in Puntland aysan fadhiisan doonin shirarka GWQ. Puntland ayaa sheegtay in arrimaha khuseeya danaha labada dhinac ay kala hadli doonto dowladda federaalka. Qoraalka waxa kale oo uu tilmaamay in khilaafka Puntland uu ka dhashay sida ay u kala horreeyaan arrimaha la doonayo in laga heshiiyo. Tusaale ahaan, warqadda waxaa lagu xusay in ka qeybgalka Puntland ee kulamada GWQ ay ku xiran tahay wax-ka-qabashada arrinta Soomaaliland-Soomaaliya iyo Soomaaliland-Puntland, in laga adkaado Al-Shabaab iyo Daacish, iyo sidoo kale in la isla meel dhigo qorshaha dhismaha dowladnimada (nooca federal oo ay tahay in Soomaaliya ay qaadato). Inkastoo madaxda Puntland aysan diidin nuxurka qodobbadii lagu heshiiyey, haddana qoraalka waxaa lagu caddeeyay in Puntland ay u aragto in hab-raaca lagu heshiiyey uu awood siinayo dowladda federaalka, islamarkaana xaddidayo awoodaha fulinta iyo garsoorka ee dowlad-goboleedyada. Madaxweyne Deni ayaa magacaabay guddi farsamo oo Puntland u qaabilsan wada xaajoodyada arrimaha federaalka oo qaab labo-geesood ah uga wada hadli doona arrimaha la isku hayo. Maqnaanshaha Puntland ee shirarka GWQ waxay dhabar jab ku noqonaysaa qorshihii ahaa in laga wada hadlo, lagana heshiiyo arrimaha siyaasadeed ee la isku hayo, taasoo horseedi karta in la dhameystiro dastuurka federaalka kumeelgaarka ah.

Midda labaad, si uu GWQ usii wado ka tashiga arrimaha la isku hayo, waxaa la isku raacay in la is waafajiyo doorashooyinka Dowlad-goboleedyada. Dhinac marka laga eego, doorashooyinka dowlad-goboleedyada ayaa sanad walba ka weeciya diiradda dowladda federaalka. Waxa ay sidoo kale beddeleysaa xubinnimada GWQ. Sidaas awgeed, is waafajinta doorashooyinka dowlad-goboleedyada waxay faa'ido u leedahay in xubnaha GWQ ay sii wadaan wadatashiyada socda iyo sidoo kale in la yareeyo wakhtiga iyo dhaqaalaha sanad walba ku baxa doorashooyinka dowlad-goboleedyada. Dhinaca kale, muddo xileedyada Madaxweynayaasha Dowlad-gobaleedyada ayaa ku eg waqtiyo kala duwan. Mudo kordhinta ayaa ah khad cas waxayna sababtaa dhibaatooyin adag sababtoo ah siyaasiyiinta mucaaradka ee Dowlad-goboleed kasta ma oggola in la dheereeyo muddo xilleedka madaxda. Qodobka is-waafajinta doorashada dowlad-goboleedyada ayaa ku noqon doona caqabad kale wadahadalka GWQ ee arrimaha siyaasadda ee la isku hayo.

Midda saddexaad, mudnaanta ugu weyn ee dowladda federaalka waa dagaalka socda ee ka dhanka ah al-Shabaab. Dowladda federaalka waxay doonaysaa taageerada iyo iskaashiga madaxweynayaasha dowlad-goboleedyada, si loo abaabulo agab iyo ciidamo loogana qeyb qaato dagaalka. Wada-tashiga GWQ ee ku saabsan is-waafajinta doorashada Dowlad-goboleedyada ayaa muhiim u noqon doona xiriirka ka dhexeeya dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyada iyo sidoo kale iskaashiga hoggaanka dowlad-goboleedyada ee dagaalka. Isku dheelitirka labadan ayaa hoggaanka dowladda federaalka caqabad ku noqon doona.

Midda afaraad, Madaxda dowladda federaalka ayaa hammigoodu sarreeyaa waxa ayna doonayaan in labo shir oo GWQ ah ay ku xalliyaan shan arrimood oo siyaasadeed oo lagu muransan yahay. Ka-qeybgalka hay'adaha ay khusayso arrimahan ayaa ah mid xaddidan, qaabka ay dowladda federaalka wax u wado waxaa loo arki karaa hannaan degdeg ah oo aan noqon doonin mid waara. Xawliga ay madaxda dowladda federaalka ku doonayaan in looga heshiiyo arrimo muran badan ka taagan yahay iyo dhameystirka dastuurka ayaa loo arki karaa inay caqabad ku noqon karto wada-hadallo guul leh iyo heshiis laga gaaro arrimaha siyaasadda ee curyaamiyay dadaalladii hore ee dowlad-dhisidda Soomaaliya.

Xalka: Talooyin tixgelin mudan

Si looga faa'ideysto guulihii laga gaaray ka heshiinta arrimaha la isku hayo iyo ka heshiinta arrimaha haray iyadoo loo marayo hannaan loo dhan yahay oo laga wada qeyb-galayo, madaxda dowladda federaalka iyo kuwa dowlad-goboleedyada waxay tixgelin karaan talooyinkan.

Marka hore, waa in GWQ uu ka hadlaa hal arin oo la isku hayo markiiba. In hal shir looga doodo loogana heshiiyo nooca garsoorka iyo awood qeybsiga ayaa sababtay in Puntland ay ka baxdo xubinnimada GWQ. In dabayaaqada Febraayo laga hadlo doorashooyinka federaalka iyo dowlad goboleedyada, federaaleynta maaliyadda, iyo maqaamka Muqdisho looma arko mid suuragal ah. Iyadoo ay ka qeyb qaadanayaan hay'adaha ay khusayso, GWQ wuxuu muddeyn karaa in labadii biloodba mar laga wada hadlo lagana heshiiyo hal arrin oo la isku hayo. Taasi waxay horseedi kartaa in sanad gudihiisa heshiis laga gaaro lix arrimood oo la isku hayo, taasoo noqon lahayd guul weyn.

Midda labaad, waa inay madaxda dowladda federaalku xaqiijiyaan in wax laga qabto tabashooyinka Puntland, madaxweynahooduna uu kamid noqdo shirarka soo socda ee GWQ. Haddii Puntland la keeni waayo shirarka GWQ ,waxay noqonaysaa dib-u-dhac weyn. Dhinaca kale, waa in Puntland ay qeexdaa qodobada ay diidan tahay oo ku jira nooca garsoorka iyo qoondeynta awoodaha fulinta ee lagu heshiiyey. Waa in Golaha Wadatashiga Qaran uu diyaar u noqdaa in ay Puntland kala hadasho waxa ay tabaneyso.

Ugu dambeyntii, GWQ waxa uu u baahan yahay in uu ballaariyo ka qeybgalka doodaha arrimaha la isku hayo. Waa in uu hubiyaa in hay'adaha dowladda ay khuseyso, iyo sidoo kale bulshada rayidka, ay kaalin ku yeeshaan heshiisyada sababtoo ah qodobbada la isku hayo ma aha arrimo ay gooni u leeyihiin xubnaha GWQ. Iyadoo GWQ uu yahay madasha siyaasadeed ee ugu sarreeya ee hay'adda fulinta ee heerarka dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada laguna qaadan kara go'aanno siyaasadeed, waa in daneeyayaasha kala duwan ay ka qeyb qaataan oo ay gacan ka geystaan heshiisyada ku saabsan arrimaha siyaasadeed ee la isku hayo.

Somali Public Agenda

Mogadishu - Somalia

+252(0)85 8358

info@somalipublicagenda.org

<https://www.somalipublicagenda.org>

@somalipubagenda